



XAASHI MURTIYEEDKA U DIYAARSANAANTA MUSIIBADA

SIDA LOOGU DIYAAR GAROBO DUUFAANAHA

Dabaylaha sare waxay keeni karaan halis burbur hantiyeeed iyo koranto tagta sida ay sheegeen Adeegga Qaranka ee Cimilada (National Weather Service.) Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin waxay bixisay xogta soo socota oo ku saabsan duufaanaaha si adiga iyo qoyskaaguba aad u bedbaaddaan

Waxa la sameeyo xilliga duufaantu dhacdo:

- Demi burjikada haddaad wax karinaysid markay korantadu tagto, oo bakhtii qalabka ku shaqaynaya gaaska dabiiciga ah.
- Haddaad leedahay albaab garaash fure oo koranto ah, he loo raadi meesha gacanta lagu isticmaalo hadday tagto korantadu.
- Darawalladu waa in ay taxaddaraan, gaar ahaan kuwa wada baabuurta maqaamka sare.
- Ka fogow fiilooyinka xoogga korantada, tiirarka yutiilitida, iyo geedaha.
- Raadiyahaaga ka dhegayso tilmaamaha gurmada.

Waxa la sameeyo duufaana ka dib:

- Ka bax dhismaha burburay.
- Wac 9-1-1 si aad u sheeyo mashaqada naf-gooyada ah.
- Haddaad uriso gaar ama aad “fufuf” gudaha ka maqasho, fur dariishadaha kana tag dhismaha. Demi isha gaaska oo wac shirkadda gaaska. Gudaha ha ku isticmaalin tarraq, shumac, olol furan ama iswijyo koranta ah.
- Hadday tagto korantadu, ha xirraadeen albaabbada firijiyeeerka iyo qaboojiyahaba, taa waxay cunnada mid xargagsan ku hayn kartaa labo beri.
- Caawi deriskaaga, gaar ahaan waayeelka iyo naafada.
- Tilmaamaha ay ka mid tahay “wax waliba waa caadi” oo rasmi ah kala soco raadiyahaaga gacanta aad ku wadato ee cimilada. Raadiyahaagu waxay sii deyn wixii la samayn lahaa iyo meelaha ay ku yaalliin gabbadyada gurmada.

(Asal: www.noaa.gov, National Oceanic and Atmospheric Administration.)

(Maamulka Atmoosfeerka iyo Badweynta ee Qaranka)

Maaraynta Gurmada iyo Nabadgelyada Dalka ee Degmada Franklin, oo ah hay'ad dawli ah oo maxalli ah, waxay agaasintaa qorshaynta, tacliiminta, digniinta, waxqabadka iyo ka kabashada gurmada/musiibo ee degmadan oo dhan si ay u yarayso raadreebka xun ee ku iman kara dadka deggan meesha iyo hantidooda

Waxaa bixiyey deeq 2008 UASI waxaana la cusboonaysiiyey Oktoobar 2010

Xog Bulsho oo Gurmada oo ka Timid: (Emergency Public Information From:)

Franklin County Emergency Management and Homeland Security
5300 Strawberry Farms Blvd., Columbus, Ohio 43230
Phone 614-794-0213, Fax 614-882-3209
Email fcm&hs@franklincountyohio.gov
On the Web at www.franklincountyohio.gov/emahs/